



## Somali Senate

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

**UJEEDDO: BAAHIN SHAQO:**

**AGAASIMAHA WAAXDA QORSHAYNT SAXAAFADDA IYO TIKNOLOJIYADDA (ICT)**

**TIXRAAC SHAQO LAMBAR : 002**

**CODSIGA SHAQADA WAXA UU FURAN YAHAY:**

**18 April – 24 April 2017**

**EMAIL: [senatesom@gmail.com](mailto:senatesom@gmail.com)**

**Waajibaadka agaasimaha waaxda ;**

- Hoggaaminta qaybaha kala duwan ee waaxda qorshaynta, saxaafadda iyo ICT ee golaha iyo hubsashada suura-galinta adeeg tayo leh oo ka jawaabayo baahida dhaw iyo fog ee golaha.
- Diyaarinta iyo isku dubba-ridka xilka iyo masuuliyadda waaxda
- Maaraynta shaqaalaha waaxda si waafaqsan maamuuska, hoodada, tayada, kartida shaqaale walba leeyahay.
- Hubsashada iyo daba-galka qabsoomidda iyo hir-galinta hawlaha waaxda
- U qeybinta waajibaadka shaqo xubnaha waaxda si isu dheelli tiran.
- Ka soo dhalaalista tababka wada-shaqayn iyo iskaashi hufan oo dhex-mara waaxda iyo waaxyaha kale ee golaha.

### Address

KM-0 Shibis Dist, Banaadir  
Mogadishu-Somalia

### Contacts

Email: [info@senate.gov.so](mailto:info@senate.gov.so) - [senatesom@gmail.com](mailto:senatesom@gmail.com)  
[www.senate.gov.so](http://www.senate.gov.so)





## Somali Senate

- Diyaarinta warbaxinnada looga baahdo waaxda iyo dukumintayayta hawl kasta oo ay waaxda qabato.
- Keenista qorsheyaal ku jaan go'an ujeedooyinka dhaw iyo kuwa fog ee golaha.
- Hiraal samaynta, dajinta, diyaarinta iyo mideynta qorshayaasha muddada dhaw iyo tan fog ee golaha iyada oo la kaashanayso waaxyaha kale una kala hormarinaysa hadba sida ay u kala mudaan leeyihiin.
- Bidhaaminta iyo soo bandhigista qaabab lagu hormariyo tayada shaqaalaha waaxda tababarro joogta ah.
- Samaynta daraasado iyo dajinta mashaariic horumarineed oo ku salaysan baahida golaha.
- Ka qayb-qaadashada qaabaynta mashruucyada iyo barnaamijyada ka soconayo golaha.
- Diyaarinta warbixin xilliyeed, sanadeed, ku saabsan gudashada shaqo, guulaha, horumarinta iyo caqabadaha.
- Horumarinta adeegga teknoolajiyada ee golaha, sida helista barnaamijyada loo baahanyahay ee fududeeya maamulka maaliyadeed iyo shaqaale.
- Samaynta database ay ku kaydsan yahiiin shaqaale kasta iyo waxa uu qabto.
- Abuurista bogga golaha oo laga helo macluumaadka golaha aqalka sare oo buuxa.
- Cillad bixinta qalabka teknoolajiyada ee yaalla golaha.
- Horumarinta hawlaha teknoolajiyada ee golaha.
- Waxii shaqo ah ee kale ee ay u xilsaaraan madaxda golaha.

### Shuruudaha looga baahan yahay

- Inuu Soomaali yahay, dhimirkiisu dhan yahay, aan danbe maxkamad xukuntey galin isla markaana da'diisa ka yareyn 25 sano
- Ugu yeraan shahaada 2aad ee jaamacada (master degree) oo la xiriirta maamulka iyo maareynta, saxaafada, IT ama wax u dhigma.
- Inuu lee yahay ugu yeraan 3 sano oo khibrad shaqo ah oo la xiriirta howlaha maamulka, Saxaafada, IT ama wax u dhigma.
- Inuu ku hadli karo islamarkaana qori karo ugu yeraan luuqadaha Soomaaliga, Carabiga iyo Ingiiriska

#### Address

KM-0 Shibis Dist, Banaadir  
Mogadishu-Somalia

#### Contacts

Email: [info@senate.gov.so](mailto:info@senate.gov.so) - [senatesom@gmail.com](mailto:senatesom@gmail.com)  
[www.senate.gov.so](http://www.senate.gov.so)





## Somali Senate

- Inuu lee yahay aqoon uu si fiican ugu adeegsan karo aaladda Komputerka.

### Sida Loo soo codsanayo:

Dadka daneynaya waxay ku soo codsan karaan qaab online ah oo keliya. Waxaa lala soo xiriirayaa oo keliya dadka ku soo baxa liiska gaaban. Fadlan ku soo dir codsigaaga, Taariikh nololeedkaaga iyo nuqul shahaadooyinkaaga ka mid ah emailkan: [senatesom@gmail.com](mailto:senatesom@gmail.com). Fadlan cinwaanka codsigaaga ka dhig jagada aad soo codsanayso iyo numberka tixraaceda. Gabdhaha leh takhasuska iyo khibrada loo baahan yahay waxaa lagu boorinayaa inay soo codsadaan ugu danbeyn codsigaaga soo dir 24April 2017 4:00pm.

#### Address

KM-0 Shibis Dist, Banaadir  
Mogadishu-Somalia

#### Contacts

Email: [info@senate.gov.so](mailto:info@senate.gov.so) - [senatesom@gmail.com](mailto:senatesom@gmail.com)  
[www.senate.gov.so](http://www.senate.gov.so)

